

Suugaanta Amran Maxamed Axmed

Amran Mohamed Ahmed kom fra Somalia i 1990. Amran jobbet som tospråklærer i Finland i 9 år. Amran ble tildelt «Refugee Women of the incentive-prisen» i 2005. Amran Mohamed Ahmed er en poet og lærer. Hennes dikt er samlet i boken «Ubox Galool».

Amran Maxamed Axmed waxay ku dhalatay kuna barbaartay magaaladda Hargeisa-Somaliland. Waxay ku dhamaystay waxbarashadeedii ilaa dugsiya sare isla magaaladda Hargeisa 1975. Waxay kale oo ay qaadatay laba sano oo ah tababarka maamulka Xafiisyada iyo tijaaradda. Ka dibna waxay shaqooyin ka qabatay dalka gudahiisa iyo wadanno dhowr ah oo dibadda ah. Amran waxay qaxootinimo ku gasahy 1990 dalka Finland, halkaas oo ay ku qaadatay tababar macallin-nimo. Muddo toban sano ah Amran waxay macallimad ka ahayd dugsiyada ku yaal magaalada Vantaa ee dalka Finland, isla markaas waxay wariye ka noqotay idaacadda qoyska ee Raadiyow Sahan in ku dhow toddoba sano. Waxay qortay laba buug oo sheekooyin ah hal CD maaweelada caruurta. Waxa kale oo soo saartay hal dakomantary oo ka warbixinaayey houmarka caruurta Soomaliyeed ee Finland ku dhaqan.

Amran dareenkeeda farshaxanimada iyo maansooyinkeeda waxa loo tarjumay afka Fiinishka, Iswidishka, Ingriiska. Amran waxay ku hadashaa luqadaha Ingiriisda, Carabiga, Fiinishka waxaana la gudoonsiiyey laba abaal marin oo qiimo leh iyo shahaada sharaf intaba. Sannadkii 2007 Amran waxay uguurtay magaalada London ee carriga Ingriiska halkaas oo ay ka shaqayso ururro u adeega bulshada Somaliyeed ee dalkaas ku dhaqan. 2009kii duqa magaaladda tower Hamlets ee bariga London ayaa gudoonsiiyey shahaada sharaf. Amran waxay la shaqaysaa

ururo dhawr ah oo Somaliyeed oo ka hawlgala magaaladda London ee carriga
Ingiriiska oo ay hadda ku nooshahay.

Amran var seks år når mora hennes leste dette diktet for henne:

Amraneey edeb yeelo oo

Aqalkiina ha dhaafin oo

Hooyadaa u adeego

Aabbahaana adeeco

Hadalkiisa ogow

Jaarku yaanu ku eersan

Yaan lagaa ashtakoonin

Ilaah baa dadka uumay

Ammaan sii waligaalnani waa ta xishoota

Addinkaagiyo weedha

Ka adkow waligaa

Wixii Eebbe ku siiyo

Imaansho ha saluuginIndhoole aan wax arkeen

Ka itaalka dareeyay

Agoontaan gacal haysan

Arxankooda ha gooynin

Inta aad ifka joogta

Aakhiraan la hungoobine

Sharaftaada ilaasho

Oversatt til norsk

Amran, må du oppføre deg vel.

en gang går langt hjemme fra

Du må hjelpe moren din

Hedre din far.

Og lytt til hans ord

Plag aldri naboen Ikke la dem beskylde deg

Gud har skapt menneskene

La dem leve i fred

En jente skal oppføre seg

Pass på munnen din, ikke bare snakk

Tenk to ganger før du la det ut

Hvis du er sikker på din sak

Kan du si det veldig høyt.

Var takknemlig det du har

Var fornøyd med det du får

Aksepter livet som det kommer

Blind som kan ikke se,

Den som er gammel og svak

Foreldre løsebarn, som ikke har slekt

Dem må du hjelpe til, så lenge du lever.



Adobe Stock / VectorBum

Dette dikte er Amrans alle første dikt. Hun snakker til pennen og boka hennes for at de skal hjelpe henne til å klare eksammen som kommer om noen dager.

Tixdan oo ahayd tixdii iigu horeysay wax aan tiriyo. Si lama filaan ahna ereyadu iigu dhasheen, waxa sabab u ahaa werwer aan ka imtaxaanadiifasala sideedaad ee 1971 oo nagu soo fool lahaa. Anigoo buugayga la hadlaayana waxaan ku

bilaabay:

Ballan

Illaa eeda iyo bii

Intii aan baranayaan

Buugyow ku haystee

Beensalka iyo qalinkaan

Kula baalordayaa

Boogeeyey farahee

Kuma balfino buugyohow

Inta aan ku baal maray

Botor kuma caweynine

Naftan kuu buseeshee

Adiguun ku barataan

Baashaal aqoonine

Adaa bariga waagiyo

Badhtamaha habeenkii

Baddan kayga jiiffee

Bare macallin kaygii

Balo laga xijaabkii

Bilaash uma hadlaynine

Beenin maayo wacadkii

Bilan hooyaday iyo

Bahday noo dhexeeyee

Ballankeeni maantuu

Bishan uu ku buuxaa

Adigiyo buruudkaa.

Maansadan oo ahay tii labaad, waxaan tiriyey markii aan dugsiga sare ka bilaabay dugsigii sare ee 15 May ee magaaladda Muqdisho 1972. Waa dareen soo mara qofkasta oo dhalin yaro ah, in naftiisa iyo himiladiisu ay loolamaan ama ay iska hor yimaadaan. Hadaba sida aad ka fahmi karto tixdan aniga dareenkaygu kumuu koob nayn oo qudha naftaaya, laakiin wuxuu ahaa mid ahmiyad gaar ah siinaayey cilmiga iyo aqoonta. Waxa kale oo uu ku dheehnaa wadan nimo iyo jacayl gaar ah oo aan uu hayey hiddaha iyo dhaqan ummadeena. Waxa kale oo iyana qaddaris mudun tilmaanta aan ka bixiyey muqaalka dhulka iyo nolosha baadiyaha, oo ahayd mid aanan ku soo barbaarin, bal se uu iga keenay kalgacayl kaan dalka iyo dadka oo ahaa mid weyn. Waxa kale oo runtii sabab u ahaa nidaamkii dalka ka talin jiray markaa ee "TAWRADDA" oo ay dhalin yaradiiwakhtigaasama guud ahaanba dadka

Somaaliyeed aad u jeclaayeen uguna hanweynaayeen.

Guursan maayo

1 6.9. 1 972 Hargeisa, Somalia

Guursan maayo jeeroon

Cilmigaaxsho dooree

Aan gundhigo tacliintoon

Geyiga u adeegee

Guursan maayo jeeroo

Gobanimado waaftoo

Galbeed uu xoroobee

Guursan maayo jeero

Geesi loo han weyn yahay

Garab kayga buuxshee

Guursah maayo jeero

Hawd oo guggiida'ay

Geeduhuna magooleen

Guriga iyo ardaagaba

Lay gole fadhiistee

Sida gob iyo caadkeed

Guurtida labada reer

Gacanqaad wadaagtee

Guursanmaayo jeeroo

Guri laba daryaale ah

Gaari iiyagleeshoo

Guubaabo iyo farax

Geeraar ammaaneed

Gelbis lay mashaxaradee

Rag ninkiigayaaniyo

Kiigaadh lahaayow

Iska gaabso maantay

Talo kula gudboontee.

Guursan maayo jeeroon

Waddan kaygan ginniga ah

Macdan aan ka gooboo

Gobol gobol warshadihiyo

Laydhku isu gaadhee.

Tixdan aan ugu magac daray "Daadah", waxaan u tiriyeey inantayda curad markii ay raad dhaqaajisay ee ay gu'jirsatay. In kasta oo ay Ibtisaam ku dhalatay kuna raad dhaqaajisay magaalada Dooxa ee dalka Qadar, haddana dareen kaygu wuxuu malo awaalaayey sidii ooy joogto Daallo-Somaliland oo maqal mooyee aanan anigaygani weligay arkin waxaanan idhi:

Daadah

8.7.1977 Dooxa, Qatar

Daadah hooyo soo soco

Dalaa dala talaabada

Ubax aan diyaarshoon

Kuu dooray iga hoo

Waa doog hortaaduye

Soo daansho - daanshood

Kala daadi laafyaha

Siidaa timaha qaar

Digtoonow awaaraha

Toobka dacalka uga dhawr

Dawadii naftayday

Sow markaan ku daawado

Ijma da'o sidii roob

Dad kale ba inuu jiro

Dan miyaan ka leelrahay.

Daadah hooyo soo soco,

qalbigaygu waa damal

Daah iyo albaab ma leh

Duco waa tif iyo midhiq

Haw dagane bal ogow

Dahab iyo xariireey

Dareen hooyo ugubaan

Sida geel diraac dhalay

Danbar kii la ololaa

Qalbigaygu diiree

Daymada ishaydaan

Kaa daalahaynoo

Kugu doogsanayse

Farxad baan daraada

Ilmadayda dilq leh na

Dubka kaaga dhowroon

Ku dabooyal baadkee

Sow waan dayoobaye

Kugu maan dunuunicin

Hooyo daadah soo soco

Dalku waa dalkeenii

Maaha debedihijaan,

Ciideenu waa dahab

Damis weeye lagu lado

Dabeysheenu waa udug

Waana diiimaad wacan

Waa dayr barwaaqo ah

Dibindaabyo cuduriyo

Dulin laga fayow yahay,

Duunyadiina waa muslt

Hooyo daadah soo soco

Dusha eeg bal milicdooy

Daruuruhu hadheeyeen

Haadkuna damaashaad

Dabaylaha ku dheeleen.